

Dawladdu waxa ay soo rogaysaa tallaabooyin cusub ee heer qaran ah

Dawladdu waxa ay soo rogaysaa tallaabooyin kale oo heer qaran ah si loo hakiyo faafidda nooca koroonaaha ee omikroon.

Waxyaalaha la soo jeedinnayo waxa ka mid ah in la kala fogaado iyo in la iska dhaafo salaanta gacanta iyo hab isa siinta.

– Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu labaduba waxa ay hoosta ka xarriiqeen in loo baahan yahay in dhakhsa loo soo rogo tallaabooyin si loo hakiyo faafidda nooca omikroon. Sidaas waxa aynu ku helaynaa wakhti aynu ku helno aqoon kale oo ku saabsan fayruska. Taas darteed dawladdu waxa ay maanta soo saaraysaa saddex soo-jeedinno oo heer qaran ah, ayay tidhi Ingvild Kjerkol oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

– Dawladdu si dhow ayay ula socotaa xaaladda. Meesha kama saari karno in tallaabooyin intan ka adagi iman karaan marka dambe, haddii loo baahdo, ayuu yidhi raysalwasaare Jonas Gahr Støre.

Tallaabooyinkan oo keenaya in isu dhowaanshuhu yaraado waxay kala yihiin

- Ka fogow dadka kale, weliba hal mitir haddii ay suuraggal tahay. Iska dhaafa hab isa siinta (qodob cusub) iyo salaanta gacanta.
- Soo-jeedin ku saabsan in shirkaduhu/shaqo-bixiyeyaashu ay shaqaalaha u fududeeyaan in ay guriga ku shaqeeyaan toddobaadka oo dhan ama qaybo ka mid ah, oo tusaale ahaan la gaadhsiiyo in boqolkiiba 50 ah marka la isu wada geeyo shaqaalaha shirkadda. Waa haddii ay suurtaggal u tahay in guriga lagu shaqeeyo iyadoo aan wax dhib ah ku imanaynin adeegyada muhiimka ah ee lagama maarmaanka ah (qodob cusub)
- Waxannu codsanaynaa in dadka waaweyn ka fekeraan in ay yarayn karaan dadka ay isu dhawaanayaan (qodob cusub).
- Waxa si heer qaran ah loo soo jeedinnayaa in af-dabool la isticmaalo marka la joogo goobaha caafimaadka iyo daryeelka.

- Waxa si heer qaran ah loo soo jeedinnayaa in af-dabool la isticmaalo marka la raacayo gaadiid dadweyne iyo tagasi, iyo marka la joogo dukaammada iyo suuqyada ee aan la kala fogaan karin. Waxa islamarkaana la soo jeedinayaa in *af-dabool la isticmaalo meelaha dadku ku badan yahay ee aan la kala fogaan karin, tusaale ahaan markaad jaakeetkaaga soo qaadannaysid kadib markaad ka baxaysid qabanqaabo aad joogtay ama garoommada kubadda cagta, oo dad badan isla hal mar baxayo.*

Tallaabooyin hore loo soo rogay nooca fayruska ee omikoroon dartii

Isniintii 29-kii Nofember 2021 waxa la soo rogay dhowr tallaabo oo heer qaran ah oo lagu yaraynayo laguna hakinayo in nooca omikoroon ku faafo Norway.

Tallaabooyinkaasi waa:

- Dadka cudurka laga helo oo loo malaynayo in uu ku dhacay nooca omikoroon, waa loo dheeraynayaa muddada gooni u bixidda oo waxaa laga dhigayaa 7 maalin
- Karantiil 10 maalin ah ayaa waajib ku ah dadka guri la deggan ama sidaas oo kale ugu dhow dadka looga shakiyay in ay qaadeen nooca omikoroon. Dadkaan waxaa waajib ku ah in ay tijaabo PCR ah isaga qaadaan sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah – iyo maalinta 7-aad ka hor inta aysan karantiilka ka bixin. Karantiilka way ka bixi karaan, haddii cudurka laga waayo tijaabada maalinta 7-aad.
- Dadka kale ee u dhowaaday dad looga shakiyay in ay qaadeen nooca omikoroon, waxaa waajib ku ah in ay tijaabo iska qaadaan. Waa in ay tijaabo PCR ah isaga qaadaan sida ugu dhakhsaha badan ee suurtaggalka ah, ayaga oo iska qaadaya inta u dhexaysa 3 iyo 7 maalin markii ay dadkaas u dhowaadeen kaddib, haddii ay suurtaggal tahayna waa in aanay dad kale u dhowaannin ilaa inta laga helayo natiijada tijaabada koowaad ee cudurka laga waayay.
- Dhammaan tillaabooyinku way qabanayaan qofka tallaalan iyo midka aan tallaalnayn

- Waajibaadku meesha waa ka baxayaan haddii gadaal laga soo caddeeyo in cudurka la qaaday uusan ahayn mid uu keenay fayraska noociisa omikoroon.

Tallaabooyinkani waxay la socdaan tallaabooyinkii soo gelidda waddanka ee dhaqangalayay laga bilaabo 27-kii Nofembar. Waxa ku jiray go'aammo ku saabsan in dhammaan dadka Norway imanaya, ka dib markii ay soo joogeen Koonfur-Afrika, Namiibiya, Simbabwe, Botiswaana, Mosambiig, Lesooto, Eswatiini iyo Malaawi, ay waajib ku tahay in ay tijaabo iska qaadaan ka hor intaanay soo gelin waddanka, in ay tijaabo iska qaadaan markay yimaadaan, in ay tijaabo iska qaadaan 7 maalmo ka dib iyo in ay galaan karantiilka soo gelidda waddanka oo ah 10 maalin ah, iyadoo aanay ku xidhnayn in ay tusi karaan wax caddaynaya in ay si buuxda u tallaalan yihiin ama cudurku hore ugu dhacay. Waxa islamarkaana la madnuucay diyaaradaha si toos ah uga imanaya waddamadaas.